

## **Waaxda socdaalka waxaa ay warbixinta ku saabsan go'aanka magangalyoddoonista kuugu sheegeysaa khadka telefoonka ama fiidiyowga**

Xaaladda feyruska korona ee lagu jiro awgeed ayaa laga billaabo 16.3.2020 waxaan joojinay wargelintii ku saabsanayd go'aanka magangalyoddoonka qaxootinnimo ee qofka loogu sheegi jiray xarunta Waaxda socdaalka. Laga billaabo 30.4.2020 waxaan qofka magangalyoddoonka qaxootinnimo ugu sheegi doonnaa go'aanka, khadka telefoonka ama fiidiyowga.

Waxaa intii uu socday xaaladda feyruska korona aan sidii caadiga ahayd boostada ku dirnay, go'aannada magangalyoddoonista qaxootinnimada, ee qofka wargelin ahaanta loo siinaayo.

### **Qofka magangalyoddoonka ahoow: Sidan soo socota ayaad ku heli doontaa wargelinta go'aanka**

Marka aan go'aan ka gaarno codsigaaga magangalyoddoonka qaxootinnimada, waxaan kuu qabanaynaa ballan aan kuugu sheegi doonno go'aankaas.

- Waxaana warbixinta ku saabsan waqtiga ballankaas aad ka heli doontaa shaqaalaha xerada qaxootiga.
- Waqtiga ballanka ee ay shaqaaluhu kuu sheegeen ayaan ku soo wici doonnaa, ama waxaan kugula soo xiriireynaa dhanka fiidiyowga.
- Waxaa lagu qabtay turjubaan, kaasoo turjumi doona waxaa aan ku wadhadlayno oo dhan. Turjubaankuna wuxuu ku turjumi doonaa khadka telefoonka ama kan fiidiyowga.
- Go'aankana waxaa markaas ka gadaal laguugu soo diri doonaa boostada.

Haddii go'aanka codsiga magangalyoddoonka laguugu soo diri karo boostada, oo aadan u baahnayn in turjubaan lagu qabto marka wargelinta lagu siinaayo, waxaad heleysaa oo kaliya wargelinta dhanka boostada ah.

Ku sheegista go'aanka dhanka telefoonka ama fiidiyowgu wax saamayn ah kuma lahan waqtiga lagu qabtay in aad racfaan kaga qaadato go'aanka. Waxaa waqtiga racfaan qaadashada lagaaga bilaabayaa, maalinka aad go'aanka ka soo qaadatay boostada.